

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

Asalka biyaha

Xadiithka soo socda ee Ibnu Raziin-na\ابن رزين\ wuxuu wariyay inay biyuhu ahaayeen abuuritaanka Carshiga\العرش\ hortiis, waxaana Xadiithka wariyay Imaam Axmad\أحمد\ iyo Al Tarmathii\الترمذي\ oo Xadiith xasan ah ka dhigay, iyo Ibnu Maajah\ابن ماجة\ oo ay ka wariyyen Abuu Raziin Al Cuqaylii\أبو رزين العقيلي\ inuu yiri:

"Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Rabbigeen xaggeebuu ahaa ka hor intuusan abuurin Samaawaatka iyo arliga? Wuxuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"في مائت تحته هواء، وما فوقه هواء. ثم خلق عرشه على الماء."

"(Kaana) **Fii maa'in wa taxtahu hawaa'un, wa maa fawqahu hawaa'un. Thumma khalaqa Carshahu calaa al maa'i.** "

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Wuxuu ahaa biyo (korkood), biyahaas waxaa ka hooseeyana ay hawo yihiin, waa dabayle, waxa ka sarreyana ay hawo yihiin. Kaddibna wuxuu Carshigiisa ku abuuray biyo korkood". Wuxuuna kitaabka Al Mufhimi\المفهم\ ku wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"أن أول ما خلق الله ياقوتة حمراء ونظر إليها بالهيبة فصارت ماء، فوضع عرشه على الماء."

" **Anna awwala maa khalaqa Allaahu yaaquutatan xamraa'a wa nathara ilayhaa bi al haybati fa saarat maa'an, fa wadaca Carshuhu calaa al maa'i.** "

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Waxa ugu horreeya ee uu Ilaahay abuuray waxaa weeye xabbaad yaaquut ah oo guduudan (Yaaquutku waa jawharad qaali ah sida fasaska faragashiga la suro oo midabyo kala kuwan leh oo kale oo luulkaba ka qaalisan. Dhagaxdaas qaaliga ahna waxaa ugu qiimo badan yaaquutka). Markaasuu si haybad leh u dhugtay oo ay markaas biyo noqotay. Fiiro haybad leh macneheedu waxaa weeye fiiro ay waynaan iyo cabsiini ku dheehan tahay, oo qofka lagu fiiriyo uu cabsanayo. Markaasuu Carshigiisa biyaha dul saaray."

Xasanwali.